

OGOW XUQUUQDAADA WAKHTIGA AAD LA MACAAMILAYSID BOOLISKA

Guud

- Marka uu sarkaal booliis ahi kuusoo dhawaado, is deji xitaa haddii xuquuqdaada lagu xadgudbayo. Xusuusnow, sarkaalku wuxuu doonayaa inuu xakameeyo xaaladda. Haddii sarkaalku uu dareemo in xaaladda aysan deganayn, waxa laga yaabaa in isaga ama iyadu wax kugu dhufto, waxaana kusoo gaadhi kara dhaawac.
- Qoro magaca sarkaalka, lambarka astaanta booliska, iyo/ama lambarka baabuurka kooxda.
- Weligaa ha taaban gaadhiga ama faraska sarkaalka booliiska—waxa lagugu soo oogi karaa faldambiyeed weerar ah.

Kulanka Jidka

- Haddii sarkaal booliis ahi kaa codsado inuu kula hadlo, edboonow balse u sheeg inaad rabto inaad tagto. Ha ka jawaabin wax su'aalo ah sida halkee ayaad joogtay,, halkee ayaad u socotaa, iwm. Waxaad tidhahdaa, "Miyaa la i qabtay?" Haddii ay jawaabtu tahay maya, iska tag.
- **Looma baahna inaad tusto aqoonsi illaa marka lagu xirayo mooyee.** Haddii lagu weydiiyo magacaaga ama aqoonsigaaga, weydii haddii lagu qabtay. Haddii ay jawaabtu tahay maya, kadib iska tag adigoon magacaaga sheegin ama aqoonsi tusin.

Baarida

- Boolisku ma baari karaan adiga iyo waxa aad haysato haddii aan lagu xidhin. MARNABA si ikhtiyaari ah h u oggolaan baaris. Haddii askari uu kaa codsado inuu baaro alaabtaada ama uu jirkaaga gacanta dul mariyo, markaa laguma qabanayo ama xirayo. Had iyo jeer si edab leh laakiin adag u dheh, "Ma oggoli baaristan." Kaliya madaxa uun ha lulin.
- Khasab kuguma aha inaad sharaxdo sababta aad u diiday baaritaanka. Kaliya dheh, "Ma doonayo in la i baaro."
- Si kastaba ha noqotee haddii uu sarkaalku ku sii socdo baaritaanka, ha u diidin. Waa lagu xidhi karaa, lagu garaaci karaa ama wax kasii daran ayaa dhici kara. Waxa kuu dhaanta inaad xuquuqdaada ugu dagaalanto maxkamada horteeda.
- Haddii lagu qabto ama xiro, saraakiishu waxay xaq u leeyihiin inay gacanta dul mariyaan dharkaaga. Haddii lagu xiro, alaabtaada waa la baari karaa. Wixii sharci darro ah kaga tag guriga!

Joojinta Taraafikada

- Gacmahaagu ha ahaadaan kuwo muuqda oo siman u dul yaala isteerinka. Haddii aad soo saaranayso boorsada jeebka, iwm marka hore sarkaalka u sheeg waxa aad samaynayso.
- Deji daaqadda gaarigaaga kaliya 2-3 hiish, in ku filan in aad askariga ugu gudbin karto liisankaaga iyo kaarkaaga caymiska kuna maqli karto waxa uu askarigu ku leeyahay. Albaabada gaarigaaga ha xirnaadaan. Haddii lagaa codsado inaad ka degto gaariga, furahaaga qaado oo albaabka gaariga xir.
- Kaliya darawalku waa inuu la hadlaa sarkaalka booliska—rakaabku waa inay aamusnaadaan oo aanay dhaqdhaqaaqin. Su'aal kasta kaga su'aalo kale: Tusaale ahaan, haddii lagu weydiiyo "ma ogtahay sababta laguu joojiyey?" dheh "maya, maxaa la ii joojiyay?"
- Weligaa ha oggolaan in la baaro gaarigaaga (eeg raadinta kore).

Xirida

- Haddii sarkaal uu xiro adiga ama qof kale, edbeenow oo la shaqee. Tani waxay muhiim u tahay badbaadadaada shakhsiyeed.
- ADEEGSO XUQUUQDAADA AAMUSNIDA. Badi baabuurta boolisku waxay leeyihiin duubayaasha codka ama muuqaalka wax kasta oo aad tidhaahdana kiiskaaga AYAA LOO adeegsan doonaa. Haddii boolisku su'aalo ku weydiiyo, u sheeg inaad adigu adeegsanayso xuquuqdaada aamusnaanta ilaa inta aad qareen la hadlayso. Ku sii wado aamusnaataada ilaa xabsiga—ha kala hadlin kiiskaaga dadka kula xidhan ama shaqaalaha xabsiga.
- Xadhiga ka dib, booliska ayaa loo oggol yahay inay baaraan adiga iyo alaabtaada.
- Haddii lagu weydiiyo magac ama aqoonsi, run sheeg. Sheeg magacaaga sharciga ah iyo cinwaankaaga. Waa dembi inaad been u sheegto sarkaal boolis ah.
- Haddii qof kale la xirayo, ha isku dayin inaad farageliso. Dib u istaag masaafu yar oo wax qoro. Qoro magaca sarkaalka, lambarka astaanta booliska, iyo/ama lambarka baabuurka kooxda, haddii ay suurogal tahay. Qoro magacyada iyo macluumaadka xiriirka ee markhaatiyaasha kale.

TALLOOYINKA LA MACAAMILIDA AXMAQNIMADA AMA DHAQAN-XUMADA BOOLISKA

- 1) Haddii lagu xidhayo, aad isugu day inaad isdejiiso. Ha sameyn dhaqdhaqaaqyo lama filaan ah ama gadaal ha u noqon. Haddii aanad katiinad ku xidhnayn, gacmahaagu ha muuqdaan oo yaanay ku jirin jeebabka. Si cad ugu celceli "Kaama hor istaagayo in la i xiro."
- 2) Aad ugu dedaal inaad hesho magacyada sarkaalka, lambarada astaanta booliska, iyo/ama lambarada baabuurka kooxda. Haddii loo baahdo, kor u yeedhi oo qof kale ha qoro. Haddii qof tikidh la siiyo ama la xidho, ugu yaraan qaar ka mid ah macluumaadkan ayaa ku jiri doona tikidhka iyo/ama warbixinta booliska.
- 3) Qoro magacyada iyo lambarada taleefanka ee dhammaan markhaatiyaasha.
- 4) Haddii aad dhaawacan tahay, raadso daryeel caafimaad isla markiiba. U sheeg dhakhtarka in dhaawacaaga ay sababeen boolisku oo xaqiiji in lagu xuso diiwaankaaga caafimaad. Qaado nuqul ka mid ah diiwaankaaga caafimaad markaad ka baxdo xarunta daryeelka caafimaadka.
- 5) Isla markiiba dhaawacyadaada hala sawiro, iyadoo la adeegsanayo filim **midab** leh oo tayo wanaagsan. Haddii ay ku sawirto xarunta daryeel caafimaadku, qaado nuqul ka mid ah sawirada ama, si kaba sii wanaagsan, ha ku sawiraan kamaradaada oo sii qaado marka aad baxeysid.
- 6) Isla markiiba fariiso oo qor dhammaan tafaasiisha ku saabsan dhacdada. Wac oo weydii dhammaan markhaatiyaasha inay sidaas oo kale sameeyaan. Ka ururi bayaanka markhaatiyaasha.
- 7) U tag qareen kahor intaadan warbixinta u gudbin hay'ad dawladeed sida Dib u eegista Madaniga ah ama Arimaha Gudaha. Ha la wadaagin wax caddeyn ah - sida cajaladaha muuqaalka, bayaannada markhaatiga ah - hay'ad dawladeed adigoon tallo ka helin qareen.
- 8) KHADKAYAGA DEGDEGA AH soo wac **612-874-7867** isla markiiba si aad u soo sheegto dhacdo lagaagana caawiyo la tacaalideeda. Waxaan kuu gudbin karnaa qareenada, waxaan kaa caawin karnaa inaad u hesho daryeel caafimaad dhaawacyada, waxaan diiwaangelin karnaa dhacdadaada iyo dhaawacyadaada, waxaan kaa caawiney karnaa inaad ilaaliso cadeymaha, waxaan kuu raaci karnaa maxkamad oo aan ku siin karnaa taageero kale.



Macluumaadka waxaa bixiyey **JAALIYADAHA U MIDOOBAY AXMAQNIMADA BOOLISKA**. Nagu soo biir! Waxaan ku kulanaa Sabti kasta 1:30, 4200 Cedar Avenue South ee Minneapolis. Wixii macluumaad dheeraad ah ama haddii aad rabto in lagaa caawiyo dhacdo axmaqnimo ah oo uu boolisku sameeyay, wac khadkayaga 24-ka saac: **612-874-STOP** ama booqo boggayaga internetka www.CUAPB.org.

FADLAN OGOW: Waxa loogu talagalay inay noqoto macluumaad guud oo kaliya. Su'aalaha gaarka ah ee sharciga ama haddii lagu xiro, raadso adeegyada qareen shati haysta.